# KU QEEXAN XEERKA MINNESOTA, QAYBTA 144.751

# ISTICMAALAYAAN DARYEELAYAASHA GURIGA DARYEELKA

Qaybhosaadka 1. **Qaraarka xuquuqda.** Shakhsiga daryeelka lagu siinayo guriga daryeelka waxa uu leeyahay xuquuqda ah in:

(1) hordhac ahaan ku helo macluumaad qoraal ah ee xuquuqka ku taxluqa inta aan lagu siin daryeelka rugta caafimaadka ama inta lagu jiro bilowga booqashada indho-indheynta ee ka horreya bilabitaanka daryeelka rugta, ay ku jirto waxa la sameynayo haddii xuquuqda la jabiyo;

(2) la siiyo daryeelka iyo adeegyada ayadoo la tixraacayo qorshe ku habboon daryeelka ee ku xiran heerarka laysku raacay ee daryeelka rugta iyo qayb libaax ka qaato dhisidda iyo baddalidda qorshaha iyo qiimeynta daryeelka iyo adeegyada;

(3) hordhac ahaan loogu sheego inta aadan helin daryeelka waxa adeegyda ku taxluqa ee lagu siinayo, anshaxa daryeelka lagu bixin doono, u kala gooshidda boqaashooyinka la soo jeedinayo, doorashoyin kale ee diyaarka ah, iyo saamaynta doorashooyinkaan, ay jirto saamaynta diidmaada adeegyadaan;

(4) hordhac ahaan loogu sheego, markasta ay suurtogal tahay, wixii iska baddala qorshaha daryeelka guriga iyo door libaax laga qaato wax kasta ee iska baddala;

(5) diido adeegyada ama daawaynta;

(6) hordhac ahaan, ku ogaado, xaddidaadda kasta ee ku jira adeegyada laga helayo daryeelaha, iyo daryeelaha sababihiisa ee joojinta adeegyada;

(7) hordhac ahaan ku ogaado helitaanka daryeelka haddii adeegyada guriga uu kabayo caymiska caafimaadka, gargaarka caafimaadka, Medicare, ama barnaamijyo kale uu shakhsiga ku qoranyahay;

(8) helo, codsasho kaddib, daacadnimo lagu qiyaaso lacagta uu daryeelaha uu daryeelaha filayo in uu ka helayo qorshaha caafimaadka ee shirkadda ee uu shakhsiga ka tirsanyaha. Daacadnimo wax lagu qiyaaso waxaa waa in sidoo kale loogu diiyariyo codsiga ka imaanaya shakhsi aan ku qornayn qorshaha caafimaadka shirkadda. Macluumaadka lacag-bixinta kama dhigayso qiyaasid sharciga ee kharashka adeegyada;

(9) ogaado in ay jaalliyadda ka jiri karaan adeegyo, ay ka midyihiin adeegyada nolosha waayeelnimada iyo daryeelayaasha guri kale, iyo ogaado meesha aad macluumaadka adeegyadaan ku taxluqa ka raadsanaysid;

(10) si xor ah u kala doorto daryeelayaasha jira iyo daryeelayaasha baddalatid kaddib marka ay adeegyada bilawdaan, ka bixin xuduuddada caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka muddada dheer, gargaarka caafimaadka, Medicare, ama barnaamijyada kale ee caafimaadka;

(11) in aad macluumaadka shakhsiyeed, maaliyadda, caafimaadka ee gaarka u ah la asturo, iyo in laguugula taliyo in daryeelaha qawaaniintiisa iyo habraacyada la xariira siidaynta macluumaadkaa;

(12) ku oggolaado helitaanka xogta iyo macluumaadka qoraalka ah ee xogta ku jira ayadoo la raacayo qaybta 144.335;

(13) adeegyada uu ka helo dad tababar fiican haysta iyo tayo u leh in ay hawshooda ka soo baxaan;

(14) laguula dhaqmo si xusmad iyo xaq dhawrid leh iyo bukaanka waxiisa la xaqdhawro;

(15) ka cabatid waxa daawaynta ama daryeelka la xarira taaso ah, ama lagugu siin waayay, helitaanka ama xushmad-la'aanta iyo xaqdhawr-la'aanta ee rukunka nafsaddiisa ama hantidiisa soo foodsaartay;

(16) xor ka ahaatid xadgudubka jirka iyo qaylada;

(17) in si cagligal ah, lagu sii ogeysiiyo isbaddallada ku soo fool leh adeegyada iyo kharashyada, ay ku jirto ugu yaraan in si hordhaca toban cisho ogaysiiska adeegyada la joojinayo ee ka imaanaya daryeelaha, marka laga reebo xaalado sida:

> (i) qaataha adeegyada uu la yimaado dhaqamo si weyn u baddalaya xaaladaha shaqada ee ka dhexeeya daryeelaha guriga iyo shakhsiga adeegyada bixinaya, ama abuuraya dhaqan xadgudub leh ama ka dhigaya jawiga shaqada mid halis u geysanaysa shakhsiga adeegyada guriga bixinaya;
>
> (ii) xaalad degdeg ah ee soo foodsaarta daryeelaha aan rasmiga ahayn ama isbaddal weyn ee xaaladda qaataha taaso sababtay in loo baahdo adeegyo ka saarreeya kuwa hadda daryeelaha lagula heshiiyay iyo in daryeelaha guriga uusan si laysku hallayn karo ku kancin karin; ama
>
> (iii) qaataha uusan ahayn qof lagu caddeeyay in uu qabo jirro raagysa;

(18) ay jirto in la helo wareejin si fiican isugu dubbaridan marka uu isbaddal soo foodsaari doono adeegyada daryeelaha;

(19) ogaado sida lagula xariirayo shakhsi la shaqeeya daryeelaha ee masuul ka ah xallinta mushkiladaha iyo in uu daryeelaha baaro iyo iskudayo xallinta cabashada ama ashtakada;

(20) ogaado magaca iyo cinwaanka gobolka ama degmada ee lagala xariirayo macluumaad dheeraad ah ama gargaar;

(21) shakhsi ahaan ku adkaysado xuquuqdaan, ama ay guriga caafimaadka ku adkeeyaan bukaanka qoyskiisa marka bukaanka lagu caddeeyay kheyralmasuul, ayadoon argudasho lahayn; iyo

(22) in xanuunka iyo cudurka lagu maamulo bukaanka heerkiisa dulqaadashada.

Haddii daryeelaha uu maamulo rugta daryeelka xaafadeed, ogaysiiska qoraalka ee rugta daryeelka xafadeed ee bukaan kasta waa in la soo raaciyo tirada iyo tayada shaqaalaha, ay ku jirto shaqaalaha rasmiga iyo tabarucyaasha, ee daryeelaha u shaqeeya in ay qanciyaan qawaaniinta MN Rule 4664.0390 ee xilli kasta ka shaqeeya rugta daryeelka xaafadeed.

**HADDII AAD CABASHO KA QABTID WAX KU TAXLUQA DARYEELAHA AMA QOFKA BIXINAYA ADEEGYADAADA GURIGA DARYEELKA, WAXA AAD WACI KARTA, U QORI KARTAA, AMA TEGI KARTAA XAFIISKA CAABASHOOYINKA RUGTA, WAAXDA CAAFIAMADKA EE MINNESOTA. WAXAA KALE EE AAD LA XARIIRI KARTA XAFIISKA SARKAALKA BAARA ASHTAKA DARYEELKA MUDDADA DHEER AMA XAFIISKA SARKAALKA BAARA ASHTAKADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO NAAFONIMADA KORITAANKA.**

**Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka**
(651) 201-4201
1-800-369-7994
Fakis: (651) 281-9796
**Cinwaanka Boostada:**
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
85 East Seventh Place, Suite 300
P.O. Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970

**Sarkaalka Baara Cabashada Daryeelka Muddada Dheer**
(651) 431-2555
1-800-657-3591
Fakis: (651) 431-7452
**Cinwaanka Boostada:**
Ombudsman for Long-Term Care
P.O. Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971

**Magaca Shatiilaha: ________________________________**
**Telefoonka: ______________________________________**
**Iimeylka: ________________________________________**
**Cinwaanka: ______________________________________**
**Magaca/Darajada Qofka ay dhici karto in loo dirayo Dhibaatooyinka ama Cabashooyinka:**

**_________________________________________________**

Ujeeddoyin maclumaad bixin keliya loogamana baanha qoraalka Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga: Xeerarka MN, qaybta 144A.751

Qaybhoosaadka 2. **Fasiraadda iyo adkaynta xuquuqda.** Xuquuqdaan waxaa loo dhisay maslaxadda rukumada ee la siinayo adeegyada dareyeelka guriga. Ilaaliyaha ama waliga ama, haddii uusan meesha ka jirin ilaaliayaha ama wailiga, qofka wakiil ahaan loo xilsaaray, ayaa codsan kara in xuquuyadaan la adkeeyo. Daryeelaha guriga daryeelka kama uu codsan karo ama amri karo qofka in uu ka tanasulo mid kasta ee ka mid xuquuqdaan ee shuruud looga dhigayo helitaanka adeegyada. Qaraarkaan xuquuqda ma uu baddalayo ama hoos uma uu dhigayo xuquuqda iyo madax bannanida kale ee ka jira meesha ay rukumada adeegyada daryeelka guriga ka helayaan, dadka bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama daryeelayaasha shatiga leh ee hoosimaanaya qaybaha 144A.753.

Qaybhoosaadka 3. **Siidaynta.** Koobiga xuquuqdaan waa in la siiyo shaqsi xilliga bilabitaanka adeegyda daryeelka guriga. Koobiga waa in ay ku jiraan lambarka cinwaanka iyo telefoonka ee Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka iyo Xafiiska

Sarkaalka Baara Ashtakada Daryeelka Muddada Dheer iyo waribixin gaaban ee sharaxaya sida looga xareysanayo xafiisyadaan. Macluumaadka ku taxluqa sida loola soo xaarirayo Xafiiska Sarkaalka Baara Ashtakada Daryeelka Muddada Dheer ayaa la soo raacinayaa marka ay jirto ujrada baddaladda daryeelaha iyo ogaysiisyada daryeelayaasha rugta caafimaadka marka ay bilaabayaan wareejinta ama joojinta adeegyada.